

# CAYAYAANKA EMERALD ASH BORER WAXAA LAGA HELAA BOSTON.

Ogow sida Magaalada Boston u badbaadiso geedahena buushka iyo waxa aad samayn kartid si aad u kaalmeysid.




## MAXUU YAHAY GEEDKA BUUSHA "EMERALD ASH BORER"?

Emerald Ash Borer waa cayayaan dilla geedaha buusha marka ukuntiisa ay hoosta ka gasho qolofta kore kaddibna cunto nafaqada ku wareegto gudaha geedka. Taxsiga baalasha adag (beetle) waxaa marka hore lagu arkay Mareykanka sannadkii 2002.



## SIDEEE AYUU CAYAYAANKA EMERALD ASH BORER U SAAMEYAA GEEDAHA BOSTON?

Emerald Ash Borer waxaa la arkay 2014 iyo waxaa la ogaaday in qaar ka mid ah geedaha buushka ee ku yaal xaafadaha Boston muujiyaan calaamadaha cayayaanka. Waxay qaadan kartaa 3 ilaa 5 sanno si dibadda looga arko calaamadaha jiritaanka Emerald Ash Borer.



## MAXUU CUNAA EMERALD ASH BORER?

Cayayaanka wuxuu quutaa geedaha buushka keliya hase ahatee Emerald Ash Borer wuxuu dillaa 99% geedaha buushka uu ku fido. Haddii in ka badan hal meel marka la soo qaado saddax meel geedka buushka ay cayayaanka ku dagtay uu dhinto taasoo ugu wacan khasaarada ka soo gaarto Emerald Ash Borer, lama badbaadin karo geedka, waa in la siibo.

## MAXAA LA SAMAYN KARAA?

Waaxda Beeraha iyo Nasashada Boston (Boston Parks and Recreation Department) waxay ka shaqeysaa hubinta caafimaadka geedahena ku yaal jidodka dadweynaha. Wuxaan badbaadin doonaa geedaha caafimaadka qaba iyo waxaan siibi doonaa kuwa dhintay iyo kuwa ay sida culus u daggeen cayayaanka si aan u joojino faafidda Emerald Ash Borer.

Waxaan kaloo ka shaqeynaa Qorshaha Jiqda Magaalada Hoose (Urban Forest Plan) si aan u keydino una balaarino dalladda geedaha - iyo guud ahaan tayada nolosha reer Boston. Kordhinta maalgelinta iyo shaqaalaha daryeelka geedka waxay nagu kaalmeysaa in aan wax ka qabano cayayaanka sida Emerald Ash Borer.

## SIDEE AYAAK KAALMO UGA GEYSAN KARAA?

Fiiri geedaha la rabo in la siibo ama la daweyyo bilaha soo socdo. Marna hal meel ha ka dhaqaajinin geed si aad u geysid meel kale. Waaxda Beeraha iyo Nasashada (Parks and Recreation Department) waxay daryeeshaa geedaha ku yaal jidka iyo geedaha ku yaal beeraha; haddii aad aragtid geedka ku yaal jidka ama geed ku baxa beerta dadweynaha aad adiga u malleySid in ay ku soo daggeen Emerald Ash Borer, la xariir 311. Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan aqoonsiga geedaha buushka ee ku yaal dhul gaar loo leeyahay, sida dhulka guryaha ama ganacsiyada, la xariir aqoonyaan shahaadada haysto oo daryeela geedka.